Tilmaamaha Aragtiyda ee Dadka soo Jiidaneya ee logu talagalay Kooxaha Khibrada u leh Isbeddelka deegaanka
Waxaa taariikhdu markey ahayd 8/24/09 ansaxiyey Golaha Isku-dabaridka Mid-City CAN ee Guddi-hoosaadyada

Goobta

Kooxaha khibradda u leh isbeddelka deegaanku waxa ay ku kulmi karaan meel walba oo ku taalla xaafadda City Heights oo ah meel u dhib yar dadka ka soo qayb galaaya. Taasi oo macnaheedu tahay meel si dhib yar dadweyne fara badani uga heli karaan adeeg iyo cimilo fiican. Waxaa ereygani inta badan loo isticmaalaa dadka curyaamiinta ah, laakiin waxaa kaloo loo isticmaali karaa dadka fahanka luuqadoodu ay aad u yar tahay. Kooxdani markaa waa inay tixgaliyaan arrimahani aan kor ku soo sheegney marka ay dooranayaan meesha uu kulan ku ka dhici doono. Waxa kale oo ay kooxdu tixgaliyaan xagga nabad galyada dhalaanka iyo wakhtiga uu kulanku dhici doono.

Wakhtiga

Kooxaha khibradda u leh isbeddelka deegaanku waa inay noqdaan kuwa yeelan kara jadwal dabacsan oo garan kara dadka ka soo qayb galaaya kulanka kuwa ay yihiin. Sharciyada ay raacayaan waxaa ka mid ah: dadka waaweyni iney kulmaan 4galabnimo ilaa iyo 10fiidnimo inta u dhaxeysa, dhalaanku ineysan kulanka iman karin saacadaha uu dugsigu socdo oo ay kulankana dhammeyn karaan wakhti hore si ay u ilaaliyaan saacadda bandooda oo aysan dhallaanku bixi karin, iyo dadka cimrigoodu aadka u weyn yahay oo iyaguna kulanka ka soo qayb gali kara subaxa hore saacadaha 8subaxnimo ilaa iyo 12duhurnimo. Kulankani lama qaban karo maalmaha ciidaha ama maalmaha dadka dhaqanka gaarka ah kala lihi ay ku caabudayaan diintooda. Kooxdu waa inay sameeyaan jadwal kala geddisan, si ay u kordhiyaan tirada ka soo qayb galayaasha.

Carruur Ilaalinta

Kooxdu waa inay u diyaariyaan dadweynaha ka soo qayb galaya kulankani meelo laga yaqaanno deegaanka oo saxadoodu aad u wanaagsan tahay oo caruurtooda loogu hayo. Meelahaasi waa inay noqdaan kuwa sharciyeysan oo haysta shati ama laysan oo u soo bandhigi kara raad raac kooxda. Meelahaasi waa inay noqdaan meelo luuqado iyo dhaqan kala geddisan lagaga adeegi karo oo ay leeyihiin meelo loogu tala galay da' walba oo carruurta ka mid ahi inay ku ciyaari karaan kuwaasi oo ay ka mid yihiin (meelo ay ka bartaan waxbarasho caafimaadka la xidhiidha iyo meelo ay ku jimicsadaan). Meelahaasi waa inay tix galin karaan diimaha iyo cunnada ay diimahaasi dhigayaan in dadkooda la siiyo.

Kooxdu waxay masuul ka tahay inay si xor ah u xidhiidhiyaan waalidiinta iyo goobaha carruurta lagu hayo. Meelaha carruurta hayaa waxa ay kharashka adeegii ay qabteen ku dalici doonaan Mid City CAN oo aan ka badnayn saacadiiba $15. Kooxdu waa inay heli kartaa ugu yaraan 2 meelood oo diyaar u ah kulankiiba oo midkiiba u adeegi karo ugu

yaraan 5 carruur ah. Kooxdu waa inay tix galisaa da'da carruurta iyo inay jiraan carruur u baahan baahi gaar ah iyo inkale. Maadaama meelo adeega noocaasi ah bixin karaa ay xadidan yihiin waxaa kooxa looga baahan yahay in ay suura galiyaan in la helo adeegaasi si loogu hogaansamo ama loo fuliyo sharciga. Waxa kale oo kooxda looga baahan yahay in ay toddobaad ka hor war galiyaan Mid City CAN maalinta carruur ilaalinta la bilaabi doono.

Tarjumista

Waa in la heli karaa dad u tarjuma dadweynaha luuqadaha kala geddisan ku hadlaaya ee ka soo qayb gali doono kulamada. Kooxda kulanka qaba qaabinaysa ayaa masuul ka ah inay tilmaamaan luuqadaha u baahan in adeeg tarjumid loogu helo. Waa in ay kooxdu la xidhiidhaa Esperanza Baza ee Mid City CAN (ebaza@midcitycan.org) oo ay ka codsadaan in ay u raadiyaan dad tarjumaano ah. Adeegaasi waxaa si toos ah uuga wada hadli doona tarjumaanada iyo Mid City CAN oo metalaaya ama ku hadlaaya magaca kooxda masuulka ka ah qaban qaabada kulamadani. Codsigaasi waa in ay ku jiraan qoddobada kala ah wakhtiga kulanka, maalinta, meesha, muddada ama inta uu kulanku socon doono, iyo sababta la xidhiidha BHC. Dadka xiisaha u qaba in ay ku shaqeeyaan turjumaanimo waa inay si toos ah uga dalbadaan Mid City CAN.

Gaadiidka

Kooxda waxaa looga baahan yahay in ay doortaan meel dadka u dhow oo ay u lugayn karaan. Diyaarinta gaadiidkana kooxda ayaa ka masuul ah. Ha'yadahana waxaa looga baahan yahay in ay dadweynaha ka soo qayb galaaya shirka ama kulanka ee aan gaadiidka haysan ay u diyaariyaan basas iyo gawaadhi ay dadku raacaan. Kooxda abaabulkana waxaa looga baahan yahay inay dadweynaha u diyaariyaan baaskiilo la raaco iyo in ay dadka u abaabulaan sidii ay koox koox u wada lugeyn lahaayeen. Waxaa kale oo kooxda abaabulka looga baahan yahay in ay ka codsadaan macaawimo gaadiid MTS ta oo dadweynaha ka qaada meelo badan oo ku yaala jidadka wadnaha ah iyo jadwalka basaska iyo waliba kaartooyin ama khariidado ku qoran afaf kala duwan oo dadku aad u fahmi karaan.

Kaalinta Madaxda

Madaxa kooxda abaabulka shirku waxa uu ka kooban yihiin: gudgoomiye iyo qof ha'yadda matalaaya. Kooxda abaabulka waxaa kale oo looga baahan yahay in ay isku dayaan in madaxdu ka koobnaadaan dad ka mid ah dadweynaha kala geddisan ee ku nool xaafadda City Hieghts. Maamulkaasi la doortaa waa in ay u huraan wakhtigooda oo ay ugu yaraan 5 saacadood asbuuciiba ku tala galaan, sidii ay u abaabuli lahaayeen kooxda shirka diyaarinaysa. Madaxdu waa in ay diyaar u noqdaan haddii loo baahdo sidii ay uuga qayb gali lahaa yeen tababarada lagu qaban doono Mid City CAN, iyo ha'yadda deeq bixinta ee California (California Endowment). Madaxdu waa in ay iyagu is qiimeeyaan iyagoo ka codsanaaya in ay ka helaan dib u wargelin kooxdooda.

Macluumaadka

Macluumaad badan ayaa ka jira Mid City Can. Waxaa Mid City CAN ay qiiyaastii ugu talagashay in ay siiyaan kooxdiiba $166 bishiiba oo ah kharashka tarjumidda iyo $100 bishiiba oo ah kharashka carruur haynta. Macaamulkaasi lacagta ah ee la'isdhaafsaday waxaa si toos ah uuga wada xidhiidhi doona Mid City CAN iyo kuwa adeega bixin doona. Mid City CAN waxa kale oo ay uugu deeqi doonaan kooxaha boodhadh iyo qalimaan ay wax ku qoraan. Maadaama macluumaadku uu aad u kooban yahay waxaa looga baahan yahay in koox waliba ay eegaan macluumaadka ay haystaan iyo baahidoodu sida ay tahay iyagoo tix raacaaya dastuurkooda loo dajiyey. Macluumaadkaasi oo dhan ee ay Mid City CAN ugu deeqayaan kooxaha waxa ay ku xidhan tahay, sida ay helaan oo waxa keiya oo ay dabooli karaan muddo lix bilood ah.